

# Xuquuqda Shaqaalaha Soo galootiga

## Xuquuqaha Shaqaalaha Soo galootiga Sida uu dhigayo Xeerka Xiriirka Shaqada Qaranka

Gudiga Xiriirka Shaqaalaha Qaranka (NLRB) wuxuu ilaaliyaa xuquuqaha shaqaalaha sida uu dhigayo Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Qaranka (NLRA), iyadoo aan loo eegayn xaalada socdaalka.

Maxaa yeelay xaalada socdaalku kuma xirna haddii uu jiro xadgudub NLRA ah:

- KUMA weydiin doon-no xaaladaada socdaalka.
- UMA baahnid inaad nala wadaagto wax macluumaad ah oo kusaabsan xaaladaada socdaalka.
- UMA baahnid inaad la wadaagto macluumaadka kusaabsan xaaladda saaxiibadaadii shaqo ee hadda/hore.

Haddii ay jirto baaritaan socda oo NLRB ah mise tallaabo dhaqangalin ah oo kasocota goobta shaqada, misena adiga mise wakiilkaaga aad noo sheegtaan in gargaarka socdaalka ay lagamamaarmaan u tahay goobta shaqada si loo ilaaliyo shaqaalaha oo ah, mise suurtagalka ah inay diyaar u yihiin inay la shaqeeyaan baarista mise tallaabada fulinta NLRB, balse laga yaabo inay ka baqaan aargoosiga samaynta sidaas, waxaad samayn kartaa codsi ah in NLRB ay soo saarto Bayaanka Danta, kaas oo shaqaaluhu isticmaali karaan [ka codsanaya tallaabada dib loo dhigay ee Wasaaradda Amniga Gudaha](#). NLRB waxay sidoo kale tixgalin doontaa shahaadeynta [U visa](#) iyo [T visa](#) kiisasku habboon.

## Codsiyada Bayaanka Danta ee Taageerada Tallaabada Dib loo dhigay

Codsiga NLRB ee Bayaanka Danta ee goobta shaqo ee gaarka ah waa in lagu hagaajiyaa mid kasta/dhammaan kuwan soo socda: Wakiilka Guddiga loo xilsaaray kiiska, Isduwaha Socdaalka Gobolka, Agaasimaha Gobolka, iyo Kooxda Socdaalka. ([Immigration.Team@nlrb.gov](mailto:Immigration.Team@nlrb.gov)) gudaha Washington, DC.

Codsiyada waa inay ku jiraan lambarka kiiska NLRB, goobta shaqada ee ku lugta leh tallaabada NLRB, iyo magaca (yada) shaqo bixiyaha sida ay uga muuqato boonooyinka lacag bixinta mise dukumeentiyada kale.

## Codsiyada shahaadeynta fiisaha U iyo T

Codsiga shahaadeynta fiisaha U iyo T waa in lagu hagaajiyaa mid kasta/dhammaan kuwan soo socda: Wakiilka Guddiga ee loo xilsaaray kiiska, Isku duwaha Socdaalka ee Gobolka, Agaasimaha Gobolka, iyo Kooxda Socdaalka ([Immigration.Team@nlrb.gov](mailto:Immigration.Team@nlrb.gov)) gudaha Washington, DC.

Codsiyada waa inay abuuraan sababo macquul ah oo lagu soo gabagabeynayo in fal dambiyeed mutaysi ah la galay, kaasoo la xiriira kiis NLRB ay baartay mise ay ku dacweysay Xafiiska

Gobolka NLRB. Gaar ahaan, codsigu waa inuu farmuuqaa waxyaabaha aasaasiga ah ee ku jira fal dambiyeedka mise hawlaha mutaysta oo uu aqoonsado caddaymaha lagu taageerayo waxyabahas.

## **Agab Kale**

NLRB waxay hakis iyo agab u leedahay shaqaalaha soo galootiga ah:

- [Macluumaad baaris oo loogu talagalay Markhaatiyaasha Shaqaalaha Soo galootiga ah \(2022\)](#)
- [Ogow Xuquuqahaaga: Shaqaalaha Soo galootiga \(2023\)](#)
- [Hubinta Nabadgalyada iyo Helitaan Sharafta leh ee Shaqaalaha Soo galootiga ee Hannaanka NLRB \(2022\)](#)
- [Hubinta Xuquuqaha iyo Xalal ee Shaqaalaha Soo galootiga Hoos yimaada NLRB \(2021\)](#)
- [Habraciyada la Cusboonaysiiyay ee ka Hadlaya Xaaladda Socdaalka Arrimaha soo Ifbaxa Inta lagu gudajiro Dhageysiga NLRB \(2011\)](#)
- NLRB waxay bixisaa [Shabakad luqadda Isbaanishka](#), islamarkaana [daabacadaha NLRB ee la doortay](#) ayaa loo turjumay dhowr luqadood.

Wac 1-844-762-NLRB oo weydii inaad la hadasho Isku duwayaasha Socdaalka Gobolka iyo/mise iimayl ugu dir Kooxda Socdaalka ee Washington DC ([Immigration.Team@nlrb.gov](mailto:Immigration.Team@nlrb.gov)) oo weydiimo leh.